



Laanta sooshalka iyo caafimaadku waxay

Social- och hälsovårdssektorn  
Social Services and Health Care  
23.4.2020

SOMALI  
Karanteeni- ja eristyspäätös postitse  
23.4.2020

## Boostada ayaa laguugu soo dirayaa go'aanka karaantiilka ama gooni u haynta

Dadka u dagmay ama fayruska Korona waa la karaantiilayaa dadka uu cudurka fayruska Korona ku dhacayna gooni ayaa loo haynayaa.

Go'aanka karaantiilka ama gooni u haynta boostada ayaa laguugu soo dirayaa.

Tirada oo aad u badan darteed ayaa waxaa wakhtigan la joogo (23.4.) ka jirta boosto ku dirista go'aannada karaantiilka iyo gooni u haynta dib u dhac. Waan ka xunnahay arrintan.

Looma baahna in si gaar ah telefoon loo soo diro islamarkaasna la codso go'aanka karaantiilka iyo gooni u haynta. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad su'aalo qabto, la xiriir kalkaaliyayaasha caafimaadka ee hawlaha xakamaynta cudurada ee Helsinki, tel. 09 310 51222 (Isniin - Jimco, saacadda 9 - 15.30).

### Lacag maalmeedka cudurada faafa ee Kelada ayaa magdhabaysa dakhliga la waayay

Kelada ayaa ku siin karta lacag maalmeedka cudurada faafa, lacagtaas oo magdhaw u ah dakhliga kaa lumay ama aad waysay karaantiilka ama gooni u haynta darteed.

Codsiga lacag maalmeedka cudurada faafa si horudhac ah ayaad u xareysan kartaa adigoo aan haysan go'aanka karaantiilka ama gooni u haynta, haddii aad codsiga ku sheegto, in go'aanka aad dib ka keenayso.

Codsiga waxaa loo dirayaa Kelada.

**Macluumaadka dheeraadka ah** waxaa laga helayaa bogagga Kelada [www.kela.fi](http://www.kela.fi)  
([Lacag maalmeedka cudurada faafa waxay magdhabaysaa dakhliga la waayay](#))

Toinen linja 4 A SB 6000 00099 MAGAALADA  
Andra linjen 4 A HELSINKI  
Toinen linja 4A PB 6000, 00099 HELSINGFORS STAD  
P.O. Box 6000. 00099 CITY OF  
HELSINKI

Telefoon 09 310 5015  
Tel. 09 310 5015  
Tel. 09 310 5015

[www.hel.fi/sote](http://www.hel.fi/sote)  
[www.hel.fi/sote/sv](http://www.hel.fi/sote/sv)  
[www.hel.fi/sote/en](http://www.hel.fi/sote/en)